# Tillaabooyinkii koroonuhu way ka sii jiriyaan degmooyinka, kuwii soo gelidduna way sii soconayaan

Waxay dawladdu go’aamisay in ay sii jirto TISK la debciyay (tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid, raadraacidda cudurka iyo karantiilka) iyo in la sii wado tillaabooyinka soo gelidda waddanka ee hadda jira.

– Waxaan doonaynaa in aan xaaladda eegno oo ay sii jiraan tillaabooyin qorshuhu ahaa in haddaa la joojiyo. Kala qaadista cudurka iyo tirada dadka isbataallada la dhigay ayaa sare u kacay waddammo badan. Waxaa kale oo aan aragnaa in tirada dadka cudurka qaadaya ee waddanka ay xoogaa sare u kacayaan, sidaas darteed na ma doonayno in aan hadda tillaabooyinka sii debcinno, laakiin xaaladda ayaan joogto u qiimaynayaa. Waxaan si gaar ah ula socon doonnaa tirada dadka isbataallada la dhigay iyo xaaladda adeegyada caafimaadka iyo daryeeka, ayay tiri Ingvild Kjerkol oo ah wasiirka caafimaadka-iyo daryeelka.

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) waxay ku talinayaan sanadka inta ka hartay in la sii wado shuruuddii ahayd in uu gooni u baxo qofka la xaqiijiyo in uu qaaday koroone. Waxaa sidaas la mid ah TISK-ka la debciyay.

– Dawladduna taas ayay ku raacday. Degmooyinka ayay u suuragelinaysaa sii saadaalinta iyo qorshaynta hawlaha. Waxaanan dhammaanteen gacan ka geysan karnaa sidii faafidda cudurku u yaraan lahayd haddii aan wanaajinno nadaafadda gacmaha, guriga joogno oo tijaabo iska qaadno haddii aan calaamado isku aragno, oo gooni u baxno haddii nagala helo covid-19. Dadka aan weli tallaalka qaadan, waxaa lagu adkaynayaa in ay is tallaalaan ayay tiri Kjerkol.

## Tillaabooyin heer deegaan ah

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha labaduba si joogto ah ayay ula hadlaan degmooyinka uu cudurku ka dillaacay iyo isbataalladaba.

– Haddi cudurku degmooyin ka dillaaco waa in degmooyinku tillaabooyin heer deegaan ah soo rogaan marka ay taasi tahay lagama maarnaan oo habboon tahay. Hadda lagu jiri maayo tillaabooyin heer qaran ah, laakiin si wanaagsan ayaan ula soconnaa xaaladda waddanka iyo midda adduunka. Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxay qabaan inaysan hadda jirin baahi loo qabo tillaabooyin heer qaran ah, ayay tiri Kjerkol.
– Waxaan doonayaa in aan degmooyinka la yeesho wadashaqayn hoose. Taas oo lagama maarmaan u ah sidii si wanaagsan loogu guuleysan lahaa maaraynta cudurka safmarka ah. Waxaan sidaas darteed hubinayaa in degmooyinka la wargeliyo marka ay isbeddello yimaadaan.

Wareegtadii tillaabooyinka ka-hortagga cudurrada ayay wasaaraddu cudboonaysiiyay dabadeedna u dirtay degmooyinka oo dhan. Waxaa halkaas lagu siiyay talooyin la xiriira tillaabooyinka ka-hortagga cudurrada ee heerka deegaan ee loo baahan karo marka cudurku deegaan ka dillaaco.

## Tillaabooyinka soo gelidda waddanka

Waxay sidoo kale dawladdu go’aansatay in ay sii socdaan tillaabooyinka soo gelidda waddanka ee hadda jira. Ilaa iyo bishii maarso 2020-kii xaddidaado adag ayaa saarnaa xaqa ay ajnebigu u leeyihiin in ay Norway soo galaan, kuwaas oo sabab looga dhigay cudurka safmarka ah ee covid-19. Sida caadiga ah ajnebigu, marka qaar laga reebo, xaq uma laha in ay waddanka soo galaan oo xudduudka ayaa laga celiyaa.

Tusaale ahaan xeer-hoosaadka xudduud-ka-celintu ma qabto muwaaddiniinta waddammada Aagga Dhaqaalaha ee Yurub (EØS), dadka ka yimid waddammada saddexaad iyo kuwa ku nool waddammada "midabka basaliga ah" (waddamo ay kala qaadistooda cudurku hoosayso). Waxaa kale oo aan xeer-hoosaadku

qabanayn magangelyadoonayaasha, ajnebiga Norway deggan iyo xubnaha qoyska ee dad Norway ku nool.

– U gudbi mayno wejiga 2-aad ee joojinta tillaabooyinka soo gelidda waddanka, laakiin kuwa hadda jira ayaa sii soconaya, ayay tiri Kjerkol.

## Tillaabooyinka soo gelidda waddanka ee hadda jira

- Dhammaan dadka qaatay tallaal buuxa ee haysta caddayn la xaqiijin karo oo shaqaynaysa loogama baahna karantiil iyo tijaaba-qaad. Taas oo aan ku xirnayn waddanka qofku ka ka soo dhoofay.
- Dhammaan muwaaddiniinta EØS, iyo dadka u dhashay waddammo kale laakiin EØS deggan, way soo geli karaan Norway. Waxaa sidoo kale soo geli kara dadka deggan Ingiriiska iyo Iswiisarland. Waxaa sidoo kale loo oggolaaday in ay Norway soo geli karaan dhammaan ajnebiga ku nool waddammada loogu yeero waddammada midabka basaliga ah. Waa waddammo ka baxsan aagga EØS/Schengen oo uu Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) u arko in xaddidaadda laga debcin karo.
- Baraha laga tallaabo ee xudduudaha oo dhan dib baa loo furay. Booliskuna waxay mudnaanta siin doonaan koontaroolka dadka ka soo safray meelaha cudurku ku badan yahay, si goos-goos ah ayaana dadka loo koontarooli doonaa.
- Karantiilkii soo gelidda waddanka waa laga dhaafay dadka ka soo safray meelaha midabka liinta leh. Karantiilka soo gelidda waddanka hadda wuxuu qabanayaa keliya dadka ka soo safray waddammada leh midabka guduudan, guduudka dikhda ah, basaliga iyo dameeriga (waddammada saddexaad ee kale).
- Dadka waaweyn ee ka soo safray waddammada iyo aagagga uu karantiilku saaran yahay, waxay karantiilka soo gelidda waddanka uga bixi karaan ayagoo iska qaada tijaabo PCR ah islamarkaana cudurka laga waayo. Tijaabada waa in la qaadaa ugu horreyn saddex maalin kaddib markii waddanka la yimid (hadda ka hor waxaa la qaadi jirey 7 maalin kaddib).
- Karantiilka soo gelidda waddanka waa laga dhaafay carruurta ka yar 18 sano (taas oo ka madaxbannaan meel kasta oo ilmuhu ka soo dhoofay). Waa sii jirayaa waajibka in xudduudka tijaabo looga qaado carruurta ka

soo dhooftay meelo uu waajib karantiil saaran yahay. Waxaa kale oo lagu talinayaa in tijaabo laga qaado saddex maalin kaddib.

- Dadka ka soo dhoofay meelo uu karantiil waajib ku yahay, markay yimaadaan waa in ay is diiwaangeliyaan oo tijaabo iska qaadaan.

Khariidad muujinaysa waddammada/aagagga ku yaalla Yurub ee qofka looga baahan yahay karantiil, is-diiwaangelin iyo tijaaba-qaad marka uu waddanka soo galo (Machadka Caafimaadka Dadweynaha)

Karantiilka soo gelidda waddanka iyo xeerarka soo gelidda Norway (Machadka Caafimaadka Dadweynaha)

## Qorshaha heeganka

Waxay dawladdu go'aamisay in la sii wado qorshaha heeganka- iyo istiraatiijiyadda maaraynta cudurka safmarka ah ee covid-19 ee hadda jira. Maarayntu waxay ka taxaddaraysaa caafimaadka dadweynaha, yaraynaysaa khalkhal bulshada ku yimaada islamarkaana badbaadinaysaa dhaqaalaha.

– Maalinta caadiga ah ee leh heeganka sare ayaa ah istiraatiijiyadda looga hor tegayo in uu covid-19 horseedo xanuun badan, culays badanna saaro awoodda adeegga caafimaadka ee degmooyinka iyo isbataallada. Laakiin waxaa islamarkaana loo baahan yahay in dadku ku noolaadaan nolol maalmeed caadi ah inta ugu badan ee suurtaggalka ah, ayay hoosta ka xarriiqday Kjerkol.

### Talooyinka iyo xeerarka heer qaran ee hadda jira

- Waa in gooni loo baxaa haddii qofka laga helo covid-19 (qofkii qodobkaan jebiya waa la ganaaxi karaa).
- Marar badan gacmaha dhaqdo.
- Istiraashada jeebka oo warqad ah ama laabka suxulka isticmaal marka aad qufacayso ama hindhisayso. Kaddib na istiraashada jeebka tuur oo gacmaha dhaqo.
- Guriga joog oo tijaabo iska qaad haddii aad isku aragto calaamadaha hawa-mareenka oo cusub.

- Xubnaha guriga la deggan ee aan tallaalnayn iyo dadka kale ee u dhowaaday qof cudurka laga helay iyagoo aan tallaalnayn, waxa wacan in ay tijaabo iska qaadaan. Waxa wacan in aanay dadka kale u dhowaan ilaa ay ka imaanayso jawaabtii tijaabada oo sheegta in cudurka laga waayay.

Talooyin ku socda dadka u dhowaaday dad cudurka laga helay iyo kuwa ku jira gooni-u-baxa (Machadka Caafimaadka Dadweynaha)

## Sidaan ayaa loola jeedaa TISK la debciyay

- Degmooyinku way yaraynayaan hawlihii raadraaca cudurka.
- Karantiilka waxaa lagula taliyaa dadka halista ugu badan ugu jira in ay cudurka qaadaan: Dadka isku guriga ku nool, ama sidaas si la mid ah isugu dhow islamarkaana aan tallaalnayn/tallaal buuxa qaadan.
- Dadka kale ee u dhowaada qofka cudurka laga helay lagula talin maayo in ay karantiil galaan.
- Raadraaca cudurka ee joogtada ah waxaa lagu koobayaa dadka ay qof cudurka laga helay isku guri deggan yihiin ama si sidaas la mid ah isugu dhow yihiin.